



# Wararkii ugu Dambeeyey ee Barnaamijka Soo Jeedinta Dheelitirka iyo Isdiiwaangalinra Iskuulada Koonfur-bari ee Portland

Janaayo 22, 2021

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ah ee PPS,

Waxaan rabnaa inaan idinla socodsiino wararkii ugu dambeeyey isbedelada aan ku sameynay Barnaamijka Dheelitirka iyo Isdiiwaangalinta iskuulada Koonfur-bari ee Portland. Soo jeedintii bilowga ahayd ([fiiri iyada oo kooban](#)), ee qabyo-qoraalka bilooyin ka dib shirkii Isbahaysiga Hoggaanka Koonfur-bari waxaa loo soo bandhigay Shirkii Golaha Waxbarashada ee qabsoomay Janaayo 12keedii.

Ka dib markii ay heleen warcelintii iyo caddeyntii, Golahu waxyaabaha ay ka wada hadleen waxaa ka mid ahaa inay isweydiinayeen in shaqaaluhu tixgaliyo ikhtiyaaraadka xaqiijinaya in ardayda iskuulka Creston 6-8 ay helaan waxbarashada dugsiyada dhexe sanad-dugsiyeedka soo socda.

Isbedelada muhiinka ah ee qaraarankan la soo jeediyey waxa ay yihiin:

- Barnaamijkii Isbaanishka ee labada luqadood wax lagu barayey ardayda Dugsiga Dhewe ee Mt. Tabor wuxuu sii ahaanayaan halkiisii iyada oo aan wax isbedel ah lagu sameyneyno waqtigani halka markii hore la rabay in loo bedelo Kellogg, iyada oo tixgelinta la siin doono Wajiga 2aad ee dheelitirka iskuulada dugsiyada dhexe.
- Iskuulka Creston waxaa loo bedeli doonaa sanadka soo socda K-5. Shaqaaluhu waxa ay la kulmi doonaan qoysaska ardayda dugsiga dhewe ee Creston todobaadka soo socda sidii ay uga wada hadli lahaayeen arrimo ku saabsan shaqooyinka guriga loogu diro ardayda dugsiga dhewe.

Goluhu waxa ay tixgelin siin doonaan soo jeedinta wax ka bedelka lagu sameeyey shirkooda maalinta Talladadda, Janaayo 26keeda, kulanku wuxuu bilaabmayaa 6:00 p.m. (Kulanada waxaa loo qabanayaa qaabka lagu wada xiriyo muuq-baahiyaha sababtoo ah xanuunkani faafaya awgiis). Haddii aad jeceshihiin inaad na siisaan warcelin:

- Waxaad isticmaashaan foomka warcelinta, kaasi oo aad ku heli kartaan lixda luqadood ee la taageero, waxaanad ka heli kartaan halkan [pps.net/enrollmentbalancing](http://pps.net/enrollmentbalancing)
- Golaha Waxbarashada waxaad Emailugu soo diri kartaan halkan [SchoolBoard@pps.net](mailto:SchoolBoard@pps.net) ama waxaad Golaha u soo diri kartaa boostada qoraal School Board, P.O. Box 3107, Portland, OR, 97208
- Haddii aad rabnaa inaad faalo dadweyne ka bixisaan Kulanka Golaha Waxbarashada, waxaad soo wacdaan telefoonka 503-916-3906 ama email [PublicComment@pps.net](mailto:PublicComment@pps.net). Tilmaamaha loo raacayo faalooyinka dadweynaha waxaad ka heli kartaan kulanka Golaha [borotakoolada bogga](#).

Waad mahadsana tiihiin.